

FoodShare



WISCONSIN

A Recipe for Good Health



Dib U eegisyada Laxariira Macluumaadka Xakamaynta Tayada FoodShare

INFORMATION ABOUT FOODSHARE QUALITY CONTROL REVIEWS

Waa maxay dib u eegista xakamaynta tayada FoodShare?

Dib u eegista xakamaynta daawada ee FoodShare waa dib u eegis lagu samaynaayo kiiskaaga FoodShare si loo xaqiijiyo in wakaalada maamusha kiiskaaga FoodShare ay gunooyinka kuugusoo saartay si sax ah ayna kudhaqmayso sharuucda dawlada federaalka ah.

Dib u eegista xakamaynta tayada waxay u adeegsataa Department of Health Services (DHS) inay kuhubiso hadii:

- Barnaamijka FoodShare lagu maamulo sida sharcigu qabo.
- In wakaaladu si sax ah umaaraysay kiiskaaga.
- In macluumaadka faylka kiiskaaga kuqoranyahay mid sax ah.
- Inaad helayso gunooyinka aad xaqa uleedahay.

Maxaa kiiskayga loodoortay?

Kiiskaaga FoodShare ayaa si baqtiyaa nasiib ah loogu doortay dib u eegista xakamaynta tayada. Laguma dooran kiiskaaga sabab laxariirta wax aad samaysay ama aadan samayn. Ayadoo dib u eegis kusamaynaysa kiisas lagusoo doortay si baqtiyaa nasiib ah, DHS ayaa ogaan karta hadii wakaaladaadu ay barnaamijka FoodShare si sax ah ufulinayso.

Miyaan ka qaybgalayaa?

Sharciga federaalka ayaa sheegaaya inay qasab tahay inaad lashaqayso dib u eegista lagu wado

xakamaynta tayada. Hadaadan bixin macluumaadka lagaa codsado aadan lashaqayn dib u eegista socota, kiiskaaga FoodShare wa lagaa xiri karaa. Haday arintaani kugu dhacdo, waxaa laguu sheegi doonaa intay dhantahay mudada kiiskaagu xirnaanaayo.

Sidee ayuu nidaamka dib u eegista xakamaynta tayada barnaamijka FoodShare ushaqeeayaa?

Talaabooyinka soosocda ayaa ah qodobada ugu muhiimsan nidaamka dib u eegista tayada FoodShare:

1. Khabiirka dhanka xakamaynta tayada ah ayaa loodirayaa inuu dib u eegis kusameeyo kiiskaaga FoodShare.
2. Khabiirka ayaa dib u eegis kusamaynaaya faylka kiiskaaga FoodShare si uu u arko noocyada talaabooyinka ay qaaday wakaalada deegaankaagu.
3. Kadib marka khabiirku dib u eegista kudhameeyo faylka kiiskaaga FoodShare, wuu kusoo wacayaa si uu kuugu balamiyo waraysi si toos ah ama taleefanka lagaaga qaadaayo.

Xasuusnoow: Hadaan khabiirku awoodin inuu kulasoo xariiro si uu waraysiga kaaga qaado, wuxuu fariin ogaysiinta waraysiga ah udirayaa boostada gurigaaga asagoo kucadaynaaya taariikhda iyo saacada uu waraysiga kaaqaadaayo. Ogaysiiska waraysiga ee laguu soo diraayo waxaa kuqoran nambarka taleefan

aad wici karto si aad ubadasho taariikhda waraysiga lagaa qaadaayo haday muhiim tahay.

4. Ayadoo waraysiga qayb ka ah, waxaa lagaa codsan donaa inaad saxiixdo foomka qoran ee faafinta macluumaadkaaga. Fomkaan wuxuu ogolaansho qaas ah kabixinayaa inaan laxariiri karno ilaha kale ee macluumaadka (sida bangida, mulkiilayaasha dhulka, ama dadka aad ushaqayso) si aan uxaqijino macluumaadka aad bixisay markii lagaa diiwaangalinaayay FoodShare. Ilahaan macluumaad waxaan kacodsan karnaa inay macluumaad kabixiyaan, sida bayaanka bangiga iyo cadaynta inaad shaqayso.

Xasuusnoow: Ayadoo kuxiran sharciga gobalka aad joogto, shaqsi kasta, haayad dhaqaale, wakaalad daymaha kawarbisaxa, qof aan ushaqayso, ama dugsi ayaa fasax uhasyta inay faafiyaan macluumaad si looxaqiijiyo xaqiiqada macluumaadka aad iskaga diiwaangalisay FoodShare.

Maxaa dhacaaya kadib dib u eegista xakamaynta tayada FoodShare?

Marka waraysigaagu soodhamaado khabiirkuna uu dib u eegis kusameeyo dhamaan macluumaadka kuqoran faylka kiiskaaga FoodShare, diiwaanadaada gaarka ah, iyo ilaha kale ee macluumaadka, go'aan ayaa laga gaarayaa in gunooyinkaaga FoodShare si sax loosoosaaray iyo inkale. Hadii cilad laga helo gunooyinkaaga, waxaa warbixin agusoo marinayaa wakaaladaada hadii wax isbadal ah kudhacaan gunooyinkaaga.

Waxaad xaq uyeelanaysaa inaad racfaan kaqaadato isbadal kasta oo gunooyinkaaga lagu sameeyo ama ganaax kasta oo laguugusoo rogo inaad kaqabgali wayso hawsha dib u eegista xakamaynta tayada. Waxaa lagusoo dirayaa macluumaadka racfaanka hadii wax kamid ah talaabooyinka ay dhacaan.

Natijoooyinka dib u eegista xakamaynta tayada waxaa loodirayaa Dawlada Maraykanka waaxdeeda

Department of Agriculture Food and Nutrition Service.

Miyaan mari doonaa dib u eegisyo kale oo laxariira xakamaynta tayada FoodShare?

Khubarada dib u eegisyada dhanka xakamaynta tayada ah ee dawlada federaalku fuliso ayaa dib u eegis labaad kusamaynaaya kiisas si baqtiyaa nasiib ah lagusoo xushay. Dib u eegista labaad waa kiis horay loomuraajaceeyay ayna muraajeeceeyeen gobalku kaasoo hadana ay dawlada federaalku udooratay in dib u eegis lagu sameeyo. Hadii kiiskaagu kusoo darsamo doorashada baqtiyaa nasiibka ah, waxaa lagaa doonayaa inaad lashaqayso dib u eegayaasha heer federaal haday kulasoo xariiraan.

Macluumaadkaygu mayahay mid qarsoon?

Macluumaadka aad siiso dib u eegayaasga gobalka ama dawlada federaalka waxaa kaliya isticmaalaaya xubnaha shaqaalaha kuwaasoo maamula barnaamijyada caawinta ah si ay go'aan uga gaaraan uqalmida iyo shaqaalaha kale ee sharcigu ufasaxaayo.

Waxad xaq uleedahay inaad:

- Aragto macluumaad kasta oo si muuqata iyo si qarsoonba lagaaga aruurshay.
- Aad kadoo xaqiiqooyinka kuqoran kiiskaaga kuwaasoo aad aaminsantahay inaysan sax ahayn ama dhamaystirnayn.
- Aad arago dhamaan kiiskaaga oo dhan, marka laga reebo noocyada qaar macluumaadka kuwaasoo sharci ahaan, qarsoodi ah.

Xagee ayaan macluumaad dheeri ah kaheli karaa?

Waraaqdaan macluumaadka waxaa kujira faahfaahin kusaabsan dib u eegisyada xakamaynta tayada ee FoodShare. Wixii macluumaad aad usii faahfaahsan ah, fadlan wac khabiirka dib u eegista kusamaynaaya xakamaynta tayada adoo kawacaaya nambarka kuqoran ogaysiiska waraysiga. Hadaan helin ogaysiiskaaga, wac 608-261-8321.



Warbixinta Takoor La'aanta

Si waafaqsan sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo Maraykanka. Waaxda Beeraha (USDA) shuruucda xuquuqda madaniga ah iyo xeerarka, USDA, Wakaaladaheeda, xafiisyada, iyo shaqaalaha, iyo hay'adaha ka qayb galaya ama maamulaya barnaamijyada USDA waxaa laga mamnuucay ku takoorida ku salaysan isirka. midabka, asalka wadaka, galmada, caqiidada diinta, naafanimada, da'da, rumaynta siyaasadeed, ka aarsiga ama aargoosiga hawl xuquuq madani oo hore barnaamij kasta ama hawl ay qabatay ama maalgelisay USDA.

Dadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh oo macluumaadka barnaamijka ah (tusaale, Farta qoraalka indhoolaha, daabacaad wayn, cajal maqal ah, Luqadda Dhegoolaha ee Maraykanka, iwm), waa inuu la soo xidhaadhaa Wakaalada (Gobol ama degmo) halka ay ka soo codsadeen dheefaha. Dadka dhegoolaha ah, maqalku ku adagyahay ama leh naafo hadalka ah waxay kala soo xidhiidhi karaan USDA Is gaadhsiinta Federaalka ee Dadka Nafada ah lambarkan (800) 877-8339. Intaa waxa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luqaddo kale.

Si loo gubiyo cabashada takoor la'aanta, buuxi foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka UDSDA, (AD-3027) oo onlayn lagaga helo:

[How to File a Complaint](#), iyo xafiis kasta oo USDA ah, ama qor warqad ku socota USDA oo warqadda ku bixi dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. si aad u codsato nuqul foomka cabashada ah, soo wac **(866) 632-9992**. U soo gudbi foomkaaga la buuxiyay ama warqadda USDA addoo adeegsanaya:

- (1) boosta: Maraykanka. Waaxda beeraha
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;
- (2) fax: (202) 690-7442; or
- (3) iimaylka: program.intake@usda.gov

Hay'dani waa adeeg bixiyaha fursadda loo simanyahay